

Dugsi Hoose oo McGavock
Qorshaha Iskaashiga Waalidka (PIP)
2017-2018

WAALIDIINTU WAA BAHWADAAGTA DUGSIGA HOOSE MCGAVOCK

Iskaashiga waalidku waa muhiim si caruurta guul uga gaarto waxbarashada. Waalidiintu waxay door muhiima ku leeyihiin inay ilmahooda ka caawiyaan sidi ay waxbarashada heer sare uga gaari lahaayeen. Marka iskuullada, qoysaska, ururada bulshada iska kaashadaan inay xoojiyaan waxbarashada, caruurta iyo iskuulladabu horumar badan ayey gaaraan. Adiga, waalid ahaan waxaad bah-wadaag la tahay waxbarashada ilmahaaga sidoo kale waxaa lagu boorinayaa inaad iskaashi toosa la yeelatid.

Liiska hoose waa sida iskaashiga waalidiinta looga hawlgeliyo Dugsiga Hoos ee McGavock.

- Waalidiinta oo idil waxaa lagu casuumayaa oo lagu boorinayaa inay yimaadaan Kulanka Sanadlaha ee Xog-waranka Title I, kulamada PTO, kulamada Waalidka-Macallimiinta, iyo aqoon-kororsiga tababarada waalidiinta ee sanadka oo idil la bixiyo. Kulamada jadwal ayaa loo samayn doonaa waxaana la qaban doonaa waqtiyo kala duwan waxaana lagu qaban doonaa goobo kala duwan. Qoraalada iyo hadallada is-gaarsiinta waxaa lagu bixin doonaa qaab iyo luqad ay fahmayaan. Af-celiyeyaasha waa la diyaarin doonaa haddii loo baahdo. Iskuulku wuxuu caawin doonaa ardayda ELka wuxuuna isugu dubaridi doonaa Title 3 adeegyada Ardayda ELka marka loo baahdo.
- Waalidiinta oo idil waxay heli doonaan fursad ay ugu tabarucaan iskuulka iyo mujtamaca iskuulka. Waalidiintu iyo mujtamaca taladu ka go'do waa la aqoonsan doonaa sidoo kale waxaa la siin doonaa adeegyo iyo taakulooyin si ay u xoojiyaan barnaamijka Dugsiga Hoose ee Kirkpatrick.
- Waalidiinta oo idil waxaa lagu casuumi doonaa inay wadajir u soo diyaariyaan oo u tafatiraan qorshahan iskaashiga waalidka, heshiiska iskuulka, buuga iskuulka, iyo dukumentiyada qoran iyagoo ay weheliyaan hawladeenada iskuulku iyo mujtamaca taladu ka go'do iyagoo u maraya talooyinka laga helo xog-ururinta waalidka, waraaqaaha macluumaadka waalidka/ardayga, doodaha kooxaha, warbaahinta elektarooniga iyo faallooyinka sanduuqa talo-bixinta. Sidoo kale waalidiinta oo idil waxaa lagu casuumi doonaa inay caawiyaan qorshaynta, dib-u sixida, hirgelinta, iyo maalgelinta Qorshaha Horumarinta Iskuulka (SIP), marka la diyaarinayo. la hirgelinayo iyo marka la qiimaynayo.
- Waalidiinta oo idil waxaa la siin doonaa fursado kala duwan si loo hawlgeliyo xiriir labada dhinac u dhexeeya oo micno ku fadhiga iyo si ay saamayn ugu yeeshaan qorshaha go'aanka lala gaarayo dhammaan hawladeenada iskuulka, iyo gudoonka ee ku saabsan qaybaha kala duwan ee iskuulka ama horumarinta gudoonka iyadoo loo marayo sadexda heer ee falaga isgaarsiinta (Ururka Waalidka Macallinka, Kulamada Tashiga Waalidiinta Gudoonka McGavock.)
- Waalidiinta oo idil waxaa la siin doonaa fursado badan si ay u xoojiyaan xirfadaha barbaarinta iyo taakulaynta waxbarashada ardayga iyadoo loo marayo siminaaro, barnaamijyada bulshada, iyo kooxaha la talinta. Mawduucyada la soo jeediyo in laga hadlo waxaa ku jiri doona akhriska/qoraalka, xirfadaha xisaabta, TNReady, dib- u soohdimaynta, fursadaha iskuullada soonahaaga ka baxsan. Sidoo kale waalidiinta waxaa la siin doonaa fursad ay kaga qaybgalaan barnaamijyada waxbarashada dadka waaweyn ee ku salaysan qowmiyadaha. Miisaaniyada Title I waxaa laga yaabaa in loo adeegsado in lagu maalgeliyo barnaamijyadan iyo weliba in loo adeegsado in lagu bixiyo gaadiidka, xanaanada iyo alaabta loogu talagalay xafladahan.
- Waalidiinta oo idil waxay fursad u heli doonaan inay door ku yeeshaan ilmahooda ka gudbaya fasal ee u gudbaya fasal kale oo ka qaybgalaan kulamada hanuunninta waalidiinta, tababarada heer fasal, iyo booqashooyinka ku taxaluqa iskuulka.
- Waalidiinta oo idil waxay heli doonaa warbixinta horumarka mid-termka, report card sagaalkii todobaadba marka buundooyinka la soo gudbiyo, iyo culuumta kale ee ku saabsan macluumaadka waxbarashada markay suurto gal tahay. Qaababka kale ee loogu kuurgalo horumarka ardayga waxaa ka mid noqon doonaa inkastoo aysan intan ku koobnayn: booqashooyin guriga lagu tago, agendaha maalin walba ama fooldarka isgaarsiinta, shirarka aan caadiga ahayn ee waalidka iyo macallinka iyo shirarka caadiga ah, wargeyska bil walba soo baxa oo macallinka ama maamuluhu soo diro, fariimo iyo tababaro joogto ah oo waalidiinta iskuulka oo idil loogu talagalay.

Waan aqbalay Qorshaha Iskaashiga Waalidka Dugsiga Hoose McGavock ee 2017-2018:

Magaca Waalidka: _____ **Magaca Ardayga:** _____



Bayaanka Ogeysiiska Helitaanka Dadweynaha

Si aad u codsatid in lagu fududeeyo, fadlan la xiriir Xarunta Shaqada Mujtamaca.
 (Turjubaanada dhagoolayaasha ama dadka dhegaha culus waa in la codsado afartan iyo sideed 48 saacadood ka hore dhacdada.)
 Gudoonka Waxbarashada Degmada Nashville cidna uma takooro isir, caqiido, asalkaagii hore, jinsi, naafo xaas/ doob ama da'.

Maamulaha Dugsiga Hoose ee McGavock Marwo Smith – 615-885-8912